JamhuuriyaddaFederaalkaSoomaaliya
BaarlamaankaFederaakaSoomaaliya
GolahaShacabka

Hadalqoraalkakalfadhiga 5-aad
Docomentigakal 5-aad/kul-2-aad **20/10/2014**

Kalfadhiga 5-aad
Kulankiisa 2-aad. Saac.Fur.11:20, Saac.Xir. 1:15gd.
Guntinta (Qourum) 155-164

Ajenda

1. **FuritaankaAayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Dhaarinta Xildbibaano**
4. **Sharciga kaluumeysiga (dib u xasuusin) si loo dhameystiro codeynta**
5. **Qeybinta sharciga hantidhoorka Guud ee Qaranka**
6. **Qeybinta hishiiska Difaaca talyaaniga iyo Soomaaliya (Nuqulka asalka ah ee hishiiska lagu soogalay Ingilish Version oo Xukuumada lagu sugaayay**
7. **Warbixinta Guddiga Daraasaadka iyo soodiyaarinta sharciga Axsaabta Siyaasadeed**
8. **WarbixintaDeegaanada**
   a) **Nugaal – Xil. Maxamed Xuseen Nuur (Xagaafe)**
   b) **Mudug – Xil. Tahliil Cabdi Maxamed**
   c) **Shabeelada Dhexe Xil. C/llaahi Axmed Xuseen**

Shir-Guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamaanka Mudane Muxumad Sheekh Cusmaan (jawaari)

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Baarlamaaka Mudane Muxumad Sheekh Cusmaan (jawaari), waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna Akhriyay Xil.Sheekh shaacir.

Kadib, Guddoomiyaha wuxuu sheegay in la dhaarinaayo Xildhibaanada cusub,kahor inta aan la dhaarin ayaa labo xildhibaan waxay soo jeediyeen fikradahooda:
Xil. C/llaahi Jaamac iyo Xil. Fadhayo waxay soo jeediyeen in Baarlamaanka la horkeeno wixii u qabsoomay labadiisano ee la soo dhaafay iyo wixii u qabsoomay .

Kadib waxaa la dhaariyay Xildhibaanadii cusbaa oo kala ahaa.:-

1. Maxamed Ducaale Muuse wuxuu bedalay Marxuum Saado Cali Warsame
2. Yuusuf Maxamed Cali wuxuu bedalay Dr. Cali Khaliif Galeyr
3. Siciid Maxamed Maxamud wuxuu bedalay Marxuum Jeneral Maxamed Maxamud Xeyd.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in wixii la qabto qoraal lagu soo gudbiyo, arinkaana waa in go'aan laga yeeshaa, kalfadhigaana waxaa loo baahanyahay in la qabto shaqo wanaagsan, haddii kalfadhigaan la shaqeyn waayana ay dhicidoonto inay waxba nooqabsoomi waayaan, shaqada ugu badana waxaa qabandoona Guddiyada, wuxuuna soo jeediyay in Guddoomiyayaasha Guddiyada ay la socdaan xildhibaanada soo xaadiro iyo kuwa aan soo xaadirin. Kadib, Guddoomiyaha wuxuu u mahadceliyay Guddiga joogtada ah oo sida wanaagsan uga soo shaqeeyay weyneynta Calanka Soomaaliyeed oo 60 jirsaday xaflad balaaran oo loo qaabtay 12 Oktoober 2014. Guddoomiyaha wuxuu intaa kudaray in la joojiyay safaradii Xildhibaanada, iyo in Xildhibaankii doonayo fasax uu soo maro Guddomiyaha Guddigiisa ,Guddiga Anshaxa iyo Nidaamiyaha Golaha, Fasax qaadashada looma imaan Karo Guddoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa.

Wuxuu kaloo sheegay in Xildhibaankii maqnaado **7** Fadhi in loo qori doono waraaq digniin ah iyo $600 ooganaax ah

Kadib, Guddoomiyahab wuxuu u yeeray Xildhibaan C/risaaq Cusmaan Xasan (Jurilla) si uugolaha ugu soojeediyo waxa u qabsoomay guddiga Daraasaadka iyo soodiyaarinta Sharciga Axsaabta Siyaasadeed.

Guddoomiye C/risaaq Jurilla wuxuu sheegay in dardaarankii Odayaashii ansaxiyey Dastuurka qabyada ah in ay dhameystiraan Xildhibaanadda Baarlamanka ,inta aan la gaarin sannadka 2016ka. Wuxuu intaa ku daray in Guddiga fadhigiisa ugu horeeyey uu qabsoomay 20kii may 2014, wax yaabo badana ay u qabsoomeyn. Ayna dhiseen labo Guddi- hoosadyo ayagoo ujeedkooda ahaa in la helno hog dheeraad ah, xogtaasoo ka mid ah shuruucda dalka uu ku dhaqmi jiray iyo Dalalka sideena oo kale u burburay haddana shuruuc sameystay, wuxuu kaloo sheegey in daraasaad ay ku sameyeen Siyaasada Xildhibaanada Baarlamanka ee JFS. iyo Xisbiyiinta ka jira wadamada deriska sida - Dalka Jabuuti iyo wadamo kale.

Waxay Guddiga ay soo ogaadey in Guddoomiyhii Golaha Baarlamanka Soomaaliya ugu horeeyay ee si xor ah loo soo doortey uu ku noolyahay wadanka Zambiya ee Lusaka wuxuu kaloo sheegay in la doonayo Axsaab siyaasadeed oo sharci ah lagana raadinaayo Dowlad goboleedyada.

Wuxuu kusoo gabagabeeyay in Xildhibaanada looga baahanyahay wixii talo iyo tusaale ay hayaan ay kula soo noqdaan Guddiga Axsaabta Siyaasadda.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu sheegay in loo gudbaayo ajendaha kale waxaana loo yeeray Xil.Maxamed Xuseen Nuur Xagaafe si uu uga warbixiyo Gobolka Nugaal.

Xil. Xagaafe wuxuu sheegay in 22/05-06-07/2014, uu ka qeyb qaatay caano shubkii Boqorka oo ka dhacay maagalada Qardho, wuxuu kaloo sheegay in dhibaatada gobolka heysta ay badan tahay sida: Ceelasha biyaha oo dhaadheer oomane ah, Baahi caafimaad daro oo heysto dadka iyo duunyada, xaga waxbarashada oo yar, meelaha qaar oo cuni yari ka jirto, Wadooyinka oo burbursan, xeebihii laga kaluumeysan jiray oo la xaalufiyay IWM.

Intaa kadib Xildhibaanka wuxuu talo ku bixiyay in wax loo qabto safaradana loo badiyo si ay dhibaatada ka jirto ay u yaraato.

Xil. Fadhayo, wuxuu sheegay waa in la xisaabsamaa oo Baarlamaanka la hor keeno wixii u qabsoomay labadii sano ee lasoo dhaafay iyo wixii aan qabsoomin.

Xil.C/llaahi Jaamac, wuxuu sheegay in Baarlamaanka uu leeyahay sharci uuna shaqeeyay labadii sano ee lasoo dhaafay balse hay'adda fulinta ay meel marin weysay. Kadib, Guddoomiyha wuxuu ka codsaday in hal maalin lagu daro jadwalka si aan uga doodno.

Xil. C/llaahi Sheekh Ismaaciil, wuxuu sheegay in aan bil dhan aanan shaqeynin Aduunkana uu maleeyo inaan shaqeeyneyno, wuxuu soo jeediyay in baaqasho danbe aan loo noqonin.

Xil. Bashiir wuxuu sheegay in loo adeego danta Dalka iyo dadka waa mid meesha ku jirta.

Guddoommiyaha wuxuu sheegay in shilinka soomaaliga la socodsiiyo waana foolxumo in qof soomaali oo xamaali ah lagu xujeeyo lacag Doolar $ ah. Intaa kadib wuxuu kusoo gabagabeeyay in loo yeero Hantidhoorka guud iyo Guddoomiyaha Bangiga dhexe si loo weydiiyo su'aalo. Wuxuu kaloo sheegay in bari uu jiro shirka Golaha.

Kalfadhiga 5-aad kulankiisa 2-aad uu shir-guddoominayay Guddoomiyaha Baarlamaanka Mudane Maxamed Sheekh Xusmaan Jawaari wuxuu sheegay inuu xiran yahay saacadda markey eheyd 01:15gd.